



Warbixin ku saabsan Corona

2020-03-30

Maxaa dhacaya haddii xannaanada ama iskuulkeenu xirmo ?

Salaan sare !

Marka hore waxaan jeclaan lahaa in aan carrabka ku adkeeyo **in xiritaanka iskuulku uusan ahayn mid hadda taagan oo la xidhayo**. laakiin haddii ay dhacdo in la xidho xannaanada ama iskuulka go'aankaasi wuxuu ku dhici karaa ogaysii gaaban. Sidaa darteed waxaan rabnaa inaan u diyaar garawno xidhitaanka suurta galka ah annaga oo ah maamulka waxbrashada si xaaladda kala guurka ah ay u noqoto mid u wacan adiga iyo ilmahaaguba.

Ma ka shaqaysaa shaqo bulshada muhiim u ah ?

Si aad xaq ugu yeelato daryeel ama ilamha oo lagaa hayo inta lagu jiro xidhitaanka waa in shaqo bixiyahaagu uu kugu wargaliyey in ay shaqadaadu tahay shaqo muhiim u ah bulshada. Taasina waa shaqooyinka ay mas'uuliyiintu u arkaan in ay leeyihiin ahmiyad gaar ah si ay u socoto nolol maalmeedka bulshada inta lagu jiro xiisadda hadda taagan.

Waxa aad xaq u leedihiin oo kaliya xannaano ama ciyaal haynta haddii labadiina waalid aad ka shaqaysaan shaqo muhiim u ah bulshada oo aanan laga maarmi karin islamarkaan aanad furdaamin karaynin carruurta hayntooda. Haddii ilmahaagu leeyahay baahi gaar ah xannaanada ama iskuulka ayaa kula soo xidhiidhi doonta

Haddii aadan helin wargelintan waxa ay ka dhigantahay xaq uma lihid in aad hesho daryeel ama ilmo haynta inta lagu jiro xidhitaanka. Taas macnaheedu waa in aad u baahan tahay in aad guriga joogto oo aad daryeesho carruurtaada. Ka caawi xasuusinta shaqo siiyahaaga in uu sameeyo qiimeyn sida ugu dhkhsaha badan ee ugu suurogalsan.

Waa mas'uuliyaddaada in aad codsato daryeel ama ilmo haynta

Haddii shaqo siiyahaagu ku soo wargeliyey in aad ka shaqayso shaqo muhiim u ah bulshada oo aanan lagaa maarmi karin waa in aad nala soo socodsiiisaa haddii aad u baahantahay daryeel ama ilmo haynta haddii la xidho iskuulka ama xannaanada.

Waxa aad ku soo gudbin kartaa baahidaada daryeel ama xannaano ee uu u baahanyahay ilmahaaga adiga oo adeegsanaya adeega elektarooniga ah ama foom aad u soo gudbiso shaqaalaha iskuulka ama xannaanada. Waxa aan doonaynaa in aad nagu soo wargaliso sida ugu dhaqsaha badan. Haddii shaqo siiyahaagu aanu wali go'aan ka gaadhin qiimeyntaada , waad samayn kartaa codsiga ka dib.

Halkan ka gal bogga aad ka heli karto warbixinno dheeraad ah iyo is diwaangelinta.

www.vastervik.se/samhallsviktigtyrke

Mar walba ku soo dhawow in aad la xidhiidhid xannaanadaada ama iskuulka haddii aad qabto su'aalo ku saabsan xaaladdan.

Salaan sare

Magnus Bengtsson , maamulha maamulka carruurta iyo waxbarashada